JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 12aad* | *Cadad Gaar ah* | *Taariikhda Daabacaada 25/03/2023* |



# XEERKA QAXOOTIGA IYO MAGAN GALYO-DOONKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# XEER LR. 103/2023


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Sannadka 2023*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-989/032023** **Taar: 18/03/2023**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Qaxootiga iyo Magan-gelyo-doonka**
**Xeer Lr. 103/2023**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobbada 38aad, 76aad iyo 77aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Dersay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-05/960/2023 ee ku taariikhaysan 12/03/2023, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Qaxootiga iyo Magan-gelyo-doonka Xeer Lr. 103/2023;

**Waxaan soo-saaray;**

**Dhaqan-galka Xeerka Qaxootiga iyo Magan-gelyo-doonka Xeer Lr. 103/2023.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Qaxootiga Iyo Magan-Gelyo-Doonka**

**Xeer Lr. 103/2023**

**GOLAHA WAKIILADDU**

**Markuu Arkay: -** Qodobka 24aad Qodobka 34aad Qodobka 35aad iyo Qodobka 38aad, Qodobka 77aad, Qodobka 78aad Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay: -** Ahmiyadda balaadhan ee uu xambaarsan yahay mashruuc-sharciga Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka ee Madaxweynuhu u soo gudbiyay Golaha.

**Markuu arkay: -** Mabaadii'da caalamiga ah ee la' xidhiidha magangelyo-doonka iyo qaxootiga ee ku tilmaaman baaqa caalamiga ah ee xuquuqada Aadamaha, heshiiska caalamiga ah ee xaaladda qaxootiga ee 1969, heshiisyada caalamiga ah ee ICCPR, ICESR iyo kuwa heer goboleed ee la'xidhiidha xuquuqda qaxootiga iyo magangelyo-doonka.

**Markuu Tix-galiyay:** Soo jeedintii Gudidda Garsoorka, Shuruucda, Caddaalada iyo Xuquuqal Insaanka Golaha oo ka soo shaqeysay Xeerka iyo Dooddii Mudanayaasha Goluhu ka yeesheen xeerka oo ay ka soo baxday wax-ka-baddel iyo kaabis in lagu sameeyo qabyo-qoraalka xeerkan Qaxootiga iyo Magangalyo doonka

**Markuu Arkay:-** Go'aanka Ansixinta xeerka **Qaxootiga Iyo Magan-Gelyo-Doonka Xeer Lr. 103/2022** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **19/10/2023** kalfadhigii **4aad** fadhigiisi **13aad.**

**Markuu Arkay:-** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen **(42)** cod xeerka **Qaxootiga Iyo Magan-Gelyo-Doonka Xeer Lr. 103/2023**

# Wuxuu

Cod aqlabiyad ah oo saddex iyo sodon **(33 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Qaxootiga iyo Magan-gelyo-doonka Xeer Lr.103/2023,**

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL

**Md. Siciid Mire Faarax (Giire)**
Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad, ahna ku simaha Gudoomiyaha Golaha Wakiillada JSL

## GOLAHA WAKIILLADU

*Markuu Arkay* Qodobka 24$^{aad}$ Qodobka 34$^{aad}$ Qodobka 35$^{aad}$ iyo Qodobka 38$^{aad}$, Qodobka 77$^{aad}$, Qodobka 78$^{aad}$ Qodobka 90$^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

*Markuu Arkay: -* Ahmiyadda balaadhan ee uu xambaarsan yahay mashruuc-sharciga Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka ee Madaxweynuhu u soo gudbiyay golaha.

*Markuu Arkay: -* Mabaadii'da caalamiga ah ee la' xidhiidha magangelyo-doonka iyo qaxootiga ee ku tilmaaman baaqa caalamiga ah ee xuquuqada Aadamaha, heshiiska caalamiga ah ee xaaladda qaxootiga ee 1969, heshiisyada caalamiga ah ee ICCPR, ICESR iyo kuwa heer goboleed ee la'xidhiidha xuquuqda qaxootiga iyo magangelyo-doonka.

*Markuu Tixgaliyay* Soo jeedintii Gudidda Garsoorka, Shuruucda, Caddaalada iyo Xuquuqal Insaanka Golaha oo ka soo shaqeysay Xeerka iyo Dooddii Mudanayaasha Goluhu ka yeesheen xeerka oo ay ka soo baxday wax-ka-baddel iyo kaabis in lagu sameeyo qabyo-qoraalka xeerkan Qaxootiga iyo Magangalyo doonka.

*Markuu u codeeyay* Wax ka badelka iyo Kaabista Golaha Guurtidu ku soo sameeyeen Xeerkan, Golahuna cod gacan taag ah ugu codeeyay **Fadhigii 7$^{aad}$ ee Kal-fadhiga 5$^{aad}$** taariikhdu markay ahayd **06 March 2023.**

## WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN

Xeerka Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka
Xeer **Lr. 103/2023**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Tusmada


QAYBTA 1AAD ... 5
QODOBBO GUUD ... 5
Qodobka 1aad ... 5
Magaca Xeerka ... 5
Qodobka 2aad ... 5
Eray Bixinta ... 5
Qodobka 3aad ... 6
Xadka Adeegsiga Xeerka ... 6
Qodobka 4aad ... 6
Ujeeddada Xeerka ... 6
Qodobka 5aad ... 7
Mabaadii'da iyo Gundhigga Xeerka ... 7
Qodobka 6aad ... 7
Fasiraadda Xeerka ... 7
QAYBTA 2AAD ... 7
MAAMULKA ARRIMAHA QAXOOTIGA ... 7
Qodobka 7aad ... 7
Awoodda Ogolaanshaha Qaxootinimada iyo Magangalyo-doonka ... 7
Qodobka 8aad ... 8
Magan-gelinta ... 8
Qodobka 9aad ... 8
Maamulka Qaxootiga iyo magangalyo-doonka ... 8
Qodobka 10aad ... 8
Masuuliyadda hay'adda ... 8
1) Hay'addu waxa ay masuul ka tahay dhammaan arrimaha maamul ee Khuseeya Qaxootiga iyo Managelyo-doonka dalka Jamhuuriyadda Somaliland. ... 8
2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn nuxurka faqradda 1aad ee Qodobkan, hay'addu waxay yeelanaysaa masuuliyaddahan soo socda: ... 8
Qodobka 11aad ... 9
Guddiga Go'aan Ka gaadhidda Qaxootinimada ... 9
(Refuges status determination committee) ... 9
QAYBTA 3AAD ... 10
CODSIYADA IYO AQOONSIGA QAXOOTINIMADA ... 10
Qodobka 12aad ... 10
Soo gelista dalka ... 10
Qodobka 13aad ... 10
Xidhiidhka Hay'adda Qaxoootiga iyo Laanta Socdaalka ... 10
Qodobka 14aad ... 10
Hab-raaca Dalbashada Qaxootinimo ... 10
Qodobka 15aad ... 11
Codsiga Qaxootinimo ee Dadka Magangalyo-doonka ah ... 11
Qodobka 16aad ... 11
Qaabka Codsiga (Form) ... 11
Qodobka 17aad ... 11
Qiimaynta Codsiyada ... 11
Qodobka 18aad ... 12
Diiwaangelinta Codsiyada ... 12
Qodobka 19aad ... 12




XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

Codsiyada u Baahan Tixgalin Gaar ah ........ 12
Qodobka 20aad ........ 12
Dejinta Kumeelgaadhka ah ee dadka Magangalyo-doonka iyo Qaxootiga ah ........ 12
**QAYBTA 4AAD ........ 13**
GO'AAN KA GAADHISTA CODSIYADA IYO AQOONSIGA QAXOOTINIMO ........ 13
Qodobka 21aad ........ 13
Shuruudaha Aqoonsiga Qaxootinimo ........ 13
Qodobka 22aad ........ 13
Dadka loo Aqoonsanayo Qaxooti Toos ah (prime facia) ........ 13
Qdobka 23aad ........ 13
Dadka Aan u Qalmin Qaxootinimada ........ 13
Qodobka 24aad ........ 14
Ka Bixitaanka Xaaladda Qaxootinimada ........ 14
Qodobka 25aad ........ 14
Qoyska Qofka Qaxootinimada Loo Aqoonsaday ........ 14
Qodobka 26aad ........ 14
Midaynta Qoyska ........ 14
Qodobka 27aad ........ 15
U Cabashada Maxkamadda Sare ........ 15
**QAYBTA 5AAD ........ 15**
**WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA MAGANGALYO-DOONKA IYO QAXOOTIGA ........ 15**
Qodobka 28aad ........ 15
Waajibaadka Magangalyo-doonka iyo Qaxootiga ........ 15
Qodobka 29aad ........ 16
Xaqa Joogidda Dalka ........ 16
Qodobka 30aad ........ 16
Helidda Adeeg Waxbarasho ........ 16
Qodobka 31aad ........ 16
Helidda Adeeg Caafimaad ........ 16
Qodobka 32aad ........ 17
Helidda Xorriyadda Dhaqdhaqaaqa iyo Socdaalka ........ 17
Qodobka 33aad ........ 17
Helidda Hoyga ........ 17
Qodobka 34aad ........ 17
Xorriyadda Is Abaabulka ........ 17
Qodobka 35aad ........ 17
Xaqa Shaqada ........ 17
Qodobka 36aad ........ 17
Helidda Hantida ........ 17
Qodobka 37aad ........ 17
Helida Adeeg Caddaaladeed ........ 17
Qodobka 38aad ........ 17
Dhexgalka Bulshada ........ 17
Qodobka 39aad ........ 17
Kaadhka Aqoonsiga Qaxootinimo ........ 17
Qodobka 40aad ........ 18
Waxyaabaha ka Reeban Qofka Qaxootiga ama Magangelyo-doonka ah ........ 18
**QAYBTA 6AAD ........ 19**
**WAAYIDDA IYO KALA NOQOSHADA QAXOOTINIMADA ........ 19**




XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qodobka 41aad ..... 19
Waayidda Xuquuqda Qaxootinimo ..... 19
Qodobka 42aad ..... 19
Kala noqoshada Qaxootinimo ..... 19
Qodobka 43aad ..... 19
Ka Saaridda dalka ..... 19
Qodobka 44aad ..... 20
Reebanaanta in qof magangalyo-doon ah in lagu ciqaabo joogitaanka dalka ..... 20
Qodobka 45aad ..... 20
Xadhiga Kumeel-gaadh ah ee Qaxootiga La-saarayo ..... 20
Qodobka 46aad ..... 20
Dib-u-Celinta Magangalyo-doonka iyo Qaxootiga ..... 20
**QAYBTA 7AAD ..... 20**
**QODOBO KALA DUWAN ..... 20**
Qodobka 47aad ..... 20
Wada Shaqaynta iyo Iskaashiga ..... 20
Qodobka 48aad ..... 21
Luqadda Xeerkan ..... 21
Qodobka 49aad ..... 21
Kaabista iyo Wax ka bedelka Xeerka ..... 21
Qodobka 50aad ..... 21
Xeer-nidaamiyaal ..... 21
Qodobka 51aad ..... 21
Nasakhaad ..... 21
Qodobka 52aad ..... 21
Dhaqan-galka Xeerka ..... 21



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA 1AAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa **Xeerka Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 103/2023**

### Qodobka 2aad
### Eray Bixinta

Haddii aan xeerkan gudihiisa si kale loogu sheegin, ereyadan waxaa loola jeedaa:

**Qaxooti:-** Waxa loola jeedaa qof kasta oo cabsi jirta darteed uga soo carara waddankiisa si uu uga badbaado dagaal, colaad, cadaadis, rabshado ama cabsi ku salaysan midabkiisa, diintiisa, jinsiyadiisa ama mawqifkiisa siyaasadeed, kaas oo ku soo galay Somaliland si waafaqsan xeerkan.

**Magangalyo-doon:-** Waxaa loola jeedaa qof doonaya in loo aqoonsado qaxootinimo oo aan weli codsigiisa magangelyo loo dhammaynin, qofkaas oo uga soo cararay dalkii uu u dhashay ama uu caadi u deganaa sababo dagaal, colaado, cadaadis, siyaasad ama dhibaatooyin kale oo noloshiisa saameeyey awgeed, soona galay dalka Jamhuuriyada Somaliland si uu uga helo badbaado iyo ilaalin qaxootinimo oo waafaqsan xeerkan.

**Magangelyo:-** Waxa loola jeedaa magangalin ay dawladdu siiso dadka soo codsanaya qaxootinimo, taas oo ah badbaadada dadka magangalyo-doonka ah ee qaxootinimo loogu aqoonsan karo si waafaqan qodobada xeerkan iyo xeerarka caalamiga ah.

**Maxkamad:-** Waxa loola jeedaa Maxkamadda Sare ee JSL.

**Hay'adda: -** Waa loola jeeda Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka.

**Guddiga:-** Waxa loola jeedaa Guddiga qiimeynta Qaxootinimada.

**Diiwaan-gelin:-** Waxaa loola jeedaa tallaabo kasta ama qaab kasta oo lagu galiyo, laguna muujiyo diiwaanka loogu talo-galay in lagu diiwaangaliyo xogaha, macluumaadka, Taariikhda iyo xogaha kale ee khuseeya codsadaha.

**Diiwaan-geliye: -** Waxa looga jeedaa sarkaalka qaabilsan diiwaan-gelinta, waraysiga iyo ururinta xogta dadka magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Aqbalaad toos ah:-** Waxa looga jeedaa dadka dalkoodii ay ku dhacday dhibaato guud ee sida wadarta ah loogu aqoonsado Qaxooti ee uu madaxweynuhu oggolaado.

**Xubnaha Qoyska:-** Waxa looga jeedaa xubnaha ka tirsan Qoyska Sida Aabbe, Hooyo, Carruur iyo cidda kale ee ka tiirsan qoyska.

**Midaynta Qoyska:-** Waxa looga jeedaa midawga iyo isu keenidda xubnaha ka tirsan hal qoys marka qayb ka mid ah loo aqoonsado Qaxooti isla markaana inta kale doonayaan inay la midoobaan.

**Qoys:-** Waxa looga jeedaa Aabbe, Hooyo iyo Caruur.

**Turjumaan:-** Waxa looga jeedaa qof tababaran oo u xil saran inuu u kala af-celiyo qofka qaxootiga ah ama magangelyodoonka ah iyo dacwad hayaha inta lagu gudo jiro dacwada.

**Cabasho:-** Waxaa looga jeedaa ka cabashada go'aanka diidmada codsiga waana tallaabada uu qofka magangelyo-doonka ahi qaadan karo haddii uu ku qanci waayo go'aanka qaybta go'aan ka gaadhista qaxootiga.

**Guddoomiye:-** Waxaa looga jeeda Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka.

**Xuquuq:-** Waxa looga jeedaa xaq kasta oo uu leeyahay qofka Qaxootiga ahi ama magangelyo-doonka ahi isla markaana ku xusan Xeerkan.

**Waajibaad:-** Waxaa looga jeedaa dhammaan waajibaad kasta oo lagu waajibiyay qofka Qaxootiga ah ama magangelyo-doonka ah isla markaana uu waajibiyey Xeerkani.

**Madaxweyne:-** Waxaa looga jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somalilland.

## Qodobka 3aad
## Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxa lagu dabaqayaa loona adeegsanayaa maamulidda iyo maaraynta arrimaha dadka Magangalyo-doonka iyo qaxootiga ah ee ku sugan dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 4aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada xeerku waa: -

1) In la helo xeer iyo hannaan sharci oo lagu maamulo arrimaha Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka si waafaqsan dastuurka dalka, heshiis goboleedyada iyo heshiisyada caalamiga ah ee arrimaha Qaxootiga.
2) In la helo Xeer Faahfaahinaya nidaam ay Jamhuuriyadda Somaliland go'aan uga gaadhi karto cidda u qalanta in ay Qaxootinnimo iyo magangalyo-doonimo ku joogto dalka.
3) In la helo nidaam sharci oo illaalinaya xuquuqda iyo waajibaadka Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka ku sugan Jamhuuriyadda Somaliland.

**Qodobka 5aad**
**Mabaadii'da iyo Gundhigga Xeerka**

1) Xeerkan waxa gundhig u ah Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, shareecada Islaamka iyo Xeerarka Caalamiga ah ee la'xidhiidha illaalinta iyo dhawrista xuquuqda dadka Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah.

2) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn nuxurka faqradda 1aad ee qodobkan, mabaadii'da xeerka waxa ka mid ah; -

b) Dhawrista xuquuqda aasaasiga ah ee Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka.
t) Dhawrista iyo illaalinta xogta dhawrsan ee qofka Qaxootiga ah ama Magangalyo-doonka ah.
J) Takoor la'aanta Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka.
x) Si habboon ula macaamilka iyo in aan khasab lagu celin kairn.
Kh) In la dhawro lana illaaliyo xogta qofka Qaxootiga ah ama Magangelyo-doonka ah.
d) In qofka Qaxootiga iyo Magan-gelyo-doonka ah loola dhaqmo si waafaqsan xeerkan iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka.

**Qodobka 6aad**
**Fasiraadda Xeerka**

Xeerkan waxa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, Shareecada Islaamka, Xeerarka Caalamiga ah, Xeer goboleedyada Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka wiixii aan ka hor imanayn shareecada Islaamka, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

b) Xeerka Caalamiga ah ee Xaaladda Qaxootiga (1951).
t) Habraacyada Xeerka Caalamiga ah ee Xaaladda Qaxootiga (Protocals).
j) Heshiiska xaaladaha Gaarka ah ee Dhibaatooyinka Qaxootiga Afrika ee Ururka Midawga Afrika (1969).
x) Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha (1948).

## QAYBTA 2AAD
## MAAMULKA ARRIMAHA QAXOOTIGA

**Qodobka 7aad**
**Awoodda Ogolaanshaha Qaxootinimada iyo Magangalyo-doonka**

1. Awoodda ogolaanshaha qaxootinnimada iyo magangelyo-doonka waxa iska leh dawladda Jamhuuriyadda Somaliland iyada ayaana go'aankeeda u madaxbannaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Go'aan kasta oo Dawladda Somaliland qaxootinimo ku siiso qof ama shakhsiyaad si xeerkan waafaqsan waa arrin bini-aadminimo iyo badbaadineed.
3. Go'aanka ogolaanshaha qaxootinimada ee Dawladda Somaliland gaadho waa in aan dalna u arag ama u fasiran mid isaga lagu colaadinayo ama gardaro ay Somaliland ku kacayso.

**Qodobka 8aad**
**Magan-gelinta**

1) Qof kasta oo shisheeya ahi waxa uu xaq u leeyahay in Somaliland siiso magangalyo, haddii uu buuxiyo shuruudaha uu dhigayo xeerkani oo waafaqasan Qodobka 35aad faqraddiisa 1aad ee Dastuuka Jamhuuriyadda Somaliland
2) Bixinta Magan-gelyada lagu sheegay faqradda 1aad ee Qodobkan waxa loo arkayaa oo kaliya arrin bini-aadminimo oo ka mid ah xuquuqda uu leeyahay qofka la siiyay, loona qaadan maayo gardarro ama cadaawad ka dhan ah waddanka ay u dhasheen dadka la siiyay magan-galyadu.
3) Marka laga reebo magangalyo-doonka qaxootiga ay bixinayso Guddida go'aan ka gaadhista qaxootigu, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu awood u leeyahay in uu siiyo qofka shisheeyaha ah magangalyo siyaasadeed, ka dib marka uu la tashado masuuliyiinta Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, si waafaqsan Qodobka 90aad farqadda 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Qodobka 9aad**
**Maamulka Qaxootiga iyo magangalyo-doonka**

1) Arrimaha maamul ee la'xidhiidha dadka Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah waxa iska leh Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka taas oo masuul uga ah Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.
2) Arrimaha khuseeya maamulka iyo maaraynta dadka Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka ah waxa loo fulinayaa loona raacayaa maaraynlooda Xeerkan iyo Heshiisyada Caalamiga ah ee arrimaha Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka khuseeya kuwaas oo aan ka horimanayn shareecada islaamka.

**Qodobka 10aad**
**Masuuliyadda hay'adda**

1) Hay'addu waxa ay masuul ka tahay dhammaan arrimaha maamul ee Khuseeya Qaxootiga iyo Managelyo-doonka dalka Jamhuuriyadda Somaliland.
2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn nuxurka faqradda 1aad ee Qodobkan, hay'addu waxay yeelanaysaa masuuliyaddahan soo socda:
   b) In ay dalka Jamhuuriyadda Somaliland masuul uga noqoto maamulka iyo maaraynta arrimaha Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka.
   t) In ay dawladda kala taliyaan siyaasadaha iyo xeerarka la'xidhiidha arrimaha Qaxootiga iyo Magan-gelyodoonka.
   j) In ay dhawrto ilaalisana xuquuqda dadka Qaxootiga iyo Magan-gelyodoonka.
   x) In ay ka shaqayso daryeelka dadka Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah.
   Kh) In ay dejiso isla markaana diyaariso siyaasadaha iyo qorsheyaasha Qaran ee la'xidhiidha daryeelka Qaxootiga iyo Magan-gelyodoonka.
   D) In ay fuliso isla markaana meelmariso siyaasadaha iyo qorsheyaasha Qaran iyo kuwa caalamiga ah ee la'xidhiidha dhawrista iyo



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

daryeelka dadka Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah.

R) In ay ka shaqayso xaqiijinta in xal waara loo helo dadka Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah ee soo gala dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

S) In ay kor u qaaddo kana qayb qaadato iskaashiga heer gobol iyo caalami ee maaraynta iyo xal u helidda dhibaatooyinka dadka Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah iyada oo ku metelaysa Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.

Sh) In ay Diiwaan-geliso, keydisana xogta dadka Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga ah.

Dh) In ay diyaariso keydisana warbixinnada khuseeya Qaxootiga iyo Magangelyo-doonka.

C) In ay qabato codsiyada la xidhiidha dalbashada Qaxootinimada iyo Magangelyo-doonka.

G) In ay deristo isla markaana qiimayso codsiyada qoxootinimo ee dadka magan-gelyo doonka ah.

F) In ay samayso kaadhadhka aqoonsiga Qaxootinimo iyo warqadaha Magangelyo-doonka.

Q) In ay maamusho xerooyinka Qaxootiga iyo goobaha dib-u-dejinta, iyada oo si gaar ah loo dammaanad qaadayo nabadgelyada iyo ammaanka dadka Qaxootiga ah, wadashaqayn dhawna lala yeelanayo hay'adaha amaanka.

K) In ay dejiso qorsheyaasha iyo siyaasadaha la'xidhiidha isdhexgalka iyo kor u qaadista wada noolaanshaha bulshada Qaxootiga ah iyo bulshada ay ku dhex nool yihiin.

## Qodobka 11[aad]
## Guddiga Go'aan Ka gaadhidda Qaxootinimada
## (Refuges status determination committee)

1. Waxa xeerkan lagu dhisay guddiga go'aan ka gaadhista qaxootinnimada oo ka kooban toddoba xubnood (7) xubnood oo kala ah: -

   B) Saddex (3) xubnood oo ka socda Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha

   T) Xubin ka socota Laanta Socdaalka

   J) Xubin Wasaarada Arrimaha Gudaha ah

   X) Xubin Komishanka xuquuqal insaanka ah

   Kh) Xubin Wasaarada Cadaalada ah

2. Guddida ayaa iska dhex dooranaya Gudoomiye, Gudoomiye-ku-xigeenka iyo Xoghayaha Guud fadhigooda ugu horreeya, ka dib marka xubnaha ay soo magacaabaan Hay'adaha ay ka tirsan yihiin.
3. Fadhiyada Guddidu waxa uu ku furmayaa marka ay joogaan ugu yaraan 4 xubnood oo guddida ka mid ah.
4. Guddida lagu dhisay faqradda 1aad ee qodobkan, waxa uu masuul ka noqonayaa arrimaha ay ka mid yihiin:

   B) Dersidda iyo Go'aan ka gaadhista codsiyada qaxootinimo ee xafiiska diiwaangelinta ee Hay'addu u soo gudbiyo muddo 60 maalmood ah.

   T) Aqbalaadda iyo diidmada codsiyada qaxootinimo.

5. Haddii guddidu ay diiddo codsiga qoxootinimada, waa in ay ku sheegaan go'aankooda sababta loogu diiday codsadaha in la siiyo qaxootinimo uu dalka ku joogo, iyada oo nuqul go'aankaas ahna la siinayo codsadaha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

6. Go'aannada Guddidu waa go'aamo maamul waxana codsaduhu uga qaadan karaa rafcaan Maxkamadda Sare haddii uu ku qanci waayo go'aanka Guddida Go'aan ka Gaadhistu ka soo saartay codsigiisa qaxootinimo muddo 30 maalmood gudahood ah.
7. Maxkamadda Sare waxa ay qiimeynaysaa asbaabta diidmada aqoonsiga qaxootinimo in ay ku salaysan tahay sharci, waxayna soo saaraysaa go'aan kama danbeys ah.

## QAYBTA 3AAD
## CODSIYADA IYO AQOONSIGA QAXOOTINIMADA

### Qodobka 12^aad
### Soo gelista dalka

1) Dadka magangalyo-doonka ahi waxa ay dalka Jamhuuriyadda Somaliland ka soo gali karaan xudduudihiisa dhulka, cirka iyo badda.
2) Qof kasta oo magangalyo-doonka ah ee dalbanaya Qaxootinimadu marka uu dalka soo galo waxa uu isu dhiibayaa Ciidanka Laanta Socdaalka.
3) Ciidanka Laanta Socdaalku waxa ay la yeelanayaan waraysi, ka dibna waxa ay u soo gudbinayaan xafiiska ugu dhaw ee Hay'adda.
4) Marka Ciidanka Socdaalku Hay'adda u soo gudbiyaan, Hay'addu waxa ay bilaabaysaa diwaangalinta dadka magangalyo-doonka ah.

### Qodobka 13^aad
### Xidhiidhka Hay'adda Qaxooiotiga iyo Laanta Socdaalka

1. Ciidanka laanta socdaalku waxay masuul ka yihiin illaalinta dhamaan xudduudaha bariga ee dalka jamhuuriyadda Somaliland.
2. Qofkasta oo shisheeye ah oo jamhuuriyadda Somaliland magan-galyo waydiista oo ay ciidanka socdaalku kula kulmaan goobaha shaqadooda ee xudduudaha waxaa ku waajib ah ciidanka socdaalku in ay u ogolaadaan inuu dalka soo galo, iyagoo amni ahaan baadhitaan ku samayn kara.
3. Ciidanka socdaalku ma xidhi karaan, qofka magangalyo-doonka, waxaana ku waajib ah in sida ugu dhakhsaha badan ay fursad ugu siiyaan inuu dalka soo galo iyagoo u fududaynaya sidii uu fursad ugu heli lahaa hanaanka magangalyo-doon ee dalka isla markaana u sii gudbinaaya hay'adda barakacayaasha iyo qaxootiga ee qaranka, si ay gudidda xeerkan lagu aassaasay ay uga go'aan gaadho kiiskiisa magangalyo-doonimo si waafqasan xeerkan.
4. Waxaa ku waajib ah Ciidanka socdaalka in ay qofkasta oo magangalyo-doon ah ay amnigiisa iyo hantidiisaba ilaaliyaan ilaa inta uu kasoo gaadhayaan xafiiska ugu dhow ee haya'adda barakacayaasha iyo qaxootiga ee qaranka.

### Qodobka 14^aad
### Hab-raaca Dalbashada Qaxootinimo

Qofkast oo dalbanaya Qaxootinimo ama Magangelyo-doonimo marka uu soo gaadho dalka Jamhuuriyadda Somaliland, waxaa lagama maarmaan ah in uu qaado tallaabooyinkan soo socda: -

1) In uu isu dhiibo Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduudaha ee ugu dhaw, una sheegto xaaladdiisa isaga oo ka dalbanaya magangelyo.
2) Ciidanka Socdaalku waxa uu qoraal ugu soo gudbinayaa qofka Magangelyo-doonka ah xafiiska ugu dhaw ee Hay'adda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

3) Hay'adduna waxa ay u bilaabaysaa hab-raaca qofka Magangelyo-doonka, iyada oo ka buuxinaysa foomamka loogu talogalay ee ay Hay'addu soo saartay waana in uu ku bixiyaa codsaduhu xog run ah.
4) Hay'addu waxa ay joojin kartaa sii wadidda codsiga haddii codsaduhu ka tanaasulo.
5) Qof kasta oo sifo Sharci ah ku joogay dalka Jamhuuriyadda Somaliland oo doonaya in uu beddelo xaaladdii uu ku joogay waddanka, isaga oo doonaya in loo aqoonsado Qaxooti, waxa loo gudbinayaa Ciidanka Socdaalka si ay u xaqiijiyaan sidii uu waddanka ku soo galay.

## Qodobka 15aad
## Codsiga Qaxootinimo ee Dadka Magangalyo-doonka ah

1) Qof kasta oo magan-gelyo-doon ah oo doonaya in uu sifo Qaxootinimo ugu noolaado dalka Jamhuuriyadda Somaliland, waxa uu codsi qoraal ah u gudbinayaa hay'adda muddada ku cad warqadda uu sito ee Ciidanka Socdaalku soo siiyeen laga bilaabo maalinta uu Ciidanka Socdaalku soo gudbiyo.

2) Qofka Magangalyo-doonka ah ee codsanaya qoxootinimadu waa in uu soo buuxiyo foomka loogu talo galay, waana in uu ku soo qoro xogta ay ka mid yihiin:

   B) Magaca qofka magangalyo-doon ah oo buuxa.
   T) Magacyada xubnaha qoyska haddii ay yihiin qoys wada socda.
   J) Da'da iyo jinsiga qofka.
   X) Sababta uu u codsanayo in loo aqoonsado qoxootinimo.
   **Kh)** Hadii uu wax hanti ah dalka la soo galayna in la diiwaangaliyo.
   D) Dalka uu dhashay ee uu ka soo jeedo.
   R) Mihnadiisa, xirafiisa iyo aqoontiisa.
   S) Faahfaahinta kale ee ay hay'addu u aragto muhiim in lagu soo qoro codsiga,

3) Codsiyada qoxootinimada ee qofka magangelyo-doonka ah ee loo soo gubiyo si xeerkan waafaqsan waxa diiwangalinaysa waaxda u qaabilsan diiwaangelinta iyo qiimeynta codsiyada ee Hay'adda.

## Qodobka 16aad
## Qaabka Codsiga (Form)

1) Hay'addu waxa ay samaynaysaa foomka codsiga qaxootinimo oo tilmaamaya dhammaan xogta muhiimka ah ee looga baahan yahay codsadaha.
2) Foomka marka la buuxiyo ee lagu qoro xogta looga baahan yahay, codsadaha ayaa saxeexaya, wuxuuna caddaynayaa in xogtaasi tahay mid run ah.

## Qodobka 17aad
## Qiimaynta Codsiyada

1) Isla marka ay helaan codsiyada Qaxootinimo ee loo soo gudbiyey waxa uu Xafiiska diiwangelintu bilaabayaa qiimaynta codsiga loo soo gudbiyay si waafaqsan qodobada xeerkan, xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada kale ee ka dheegma xeerkan.

2) Xafiiska Diiwangelintu waxa uu la yeelanayaa waraysi qof kasta oo codsi qoxootinimo soo gudbiyay oo gaadhay da'da qaan-gaadhka si loo xaqiijiyo in codsigu waafaqsan yahay shuruudaha qoxootinimada ee ku xusan xeerkan.

3) Waraysiga dadka magangalyo-doonka ahi waxa ay ka dhici kartaa xafiisyada Hay'adda ama goob kasta oo kale oo Hay'addu u cayintay.

4) Qof kasta oo soo gudbiya codsigiisa Qaxootinimo si waafaqsan qodobbada Xeerkan, waxa uu xaq u leeyahay in uu helo macluumaad ku saabsan habka uu u marayo codsigiisa Qaxootinimo, isla markaana uu helo turjumaan, loona sheego natiijada qiimaynta ee codsigiisa.

**Qodobka 18aad**
**Diiwaangelinta Codsiyada**

1) Hay'addu waxay yeelanaysaa waax u qaabilsan diiwaangelinta codsiyada qoxootinimada ee dadka magangalyo-doonka ah.

2) Waaxda lagu sheegay faqradda 1aad ee qodobkani waxa ay masuul ka tahay waraysiga qofka magangalyo-doonka ah iyo diiwaangalinta xogta muhiimka ah ee looga baahan yahay qofka magangalyo-doonka ah.

3) Xogta iyo macluumaadka dadka magangalyo-doonka ahi bixiyaan waxa ay noqonaysaa mid dhawrsan waxana loo adeegsan karaa oo kaliya ujeeddada xogta loo qaaday.

4) Xogta keydsan ee qofka qaxootiga ah waxa keliya oo lagu bixin karaa amar maxkamadeed.

**Qodobka 19aad**
**Codsiyada u Baahan Tixgalin Gaar ah**

1) Hay'addu waxay tixgalin gaar ah siinaysaa oo dedejinaysaa go'aan ka gaadhista codsiyada dadka aadka u nugul.
2) Dadka aadka u nugul ee lagu sheegay faqradda 1aad ee qodobkan waxa ku jira: -
   B) Dhibaneyaasha la jidh dilay.
   T) Dadka waxyeello maskaxeed soo gaadhay.
   J) Dadka laxaadka la'.
   X) Dadka baahiyaha gaarka ah qaba.
   Kh) Carruurta.
   D) Dadka la kulmay tacadiyada jinsiga.
   R) Gabadha Qoyskeeda ka masuulka ah;
   S) ilmo kalidii socda oo aan waalid ama qof ilaaliye ahi la socon.
   Sh) Cid kasta oo u baahan tixgalin gaar ah si waafaqsan habraacyada gaarka ah ee lagu sheego xeer-nidaamiyeyaasha xeerkan ka dheegma.
3) Qiimeynta iyo tixgalinta gaarka ah ee codsiyada dadka lagu sheegay Qodobkan loo qaadan maayo takoor waxana loo fulinayaa si waafaqsan xeerka iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Jamhuuriyadda Somaliland qaybta ka tahay.

**Qodobka 20aad**
**Dejinta Kumeelgaadhka ah ee dadka Magangalyo-doonka iyo Qaxootiga ah**

1) Hay'addu iyada oo latashanaysa hay'adaha dawladda iyo kuwa caalamiga ah ee arrimaha qaxootigu khuseeyaan, waxa ay go'aaminaysaa in xero kumeelgaadh ah la dejiyo dadka magangalyo-doonka ah ee dalka soo galaya.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Xerada la dejinayo dadka magangalyo-doonka ah ee lagu sheegay faqradda 1aad ee qodobkan, waxa laga dhigayaa meel ka fog xuduudda ay dadkaasi ka soo galeen haddii duruufi saamaxdo.

3) Xerada ku meelgaadhka ah waxa looga rari karaa xero qaxooti oo rasmi ah.

## QAYBTA 4AAD
## GO'AAN KA GAADHISTA CODSIYADA IYO AQOONSIGA QAXOOTINIMO

### Qodobka 21[aad]
### Shuruudaha Aqoonsiga Qaxootinimo

1) Qofku waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo Qaxootinimo si waafaqsan Xeerkan haddii: -

B) Uu ka soo gudbay xuduud caalami ah, soona gaadhay xuduudda Jamhuuriyadda Somaliland, qabana cabsi la taaban karo oo salka ku haysa ciqaab uu la kulmay ama ka baqanayo in loo geysto sababo la'xidhiidha qowmiyadda uu yahay, dhalashadiisa, diinta uu haysto, jinsiga uu yahay iyo aragtida siyaasadeed ee uu aaminsan yahay, isla markaana aanu awoodi karin ama aanu doonayn in uu waddankiisa ku noqdo.

T) Uu jiro duullaan shisheeye, qabsasho shisheeye, dagaalo sokeeye iyo aafooyin kale oo qayb ahaan ama gabi ahaan khalkhal galinaya sharciga iyo kala danbeynta waddankiisa ama waddanka uu rasmi ahaan u degen yahay taas oo aan suurtagalinayn in uu ku noolaado.

2) Waxa kale oo qofka qaxootinimo loogu aqoonsan karaa waajib ka dhashey heshiis ay qayb ka tahay dawladda Somaliland.

### Qodobka 22[aad]
### Dadka loo Aqoonsanayo Qaxooti Toos ah (prime facia)

1) Dadka loo aqoonsanayo Qaxooti toos ah waxa ka mid ah, kuwa waddamadooda dhibaatooyin caam ah ama dagaallo ay ka jiraan ee si guud loo siiyo aqbalaad (prime facia), marka laga reebo cidda ay ku caddaato arrimaha ku xusan faqradaha Qodobka 23aad ee xeerkan.
2) Qof kasta oo waddankiisa ay ka jirto dhibaato ama dagaallo caam ah oo soo gaadha xuduudaha dalka Jamhuuriyadda Somaliland, waxa si toos ah loogu aqoonsanayaa Qaxooti.
3) Madaxweynaha ayaa leh awoodda bixinta waddamada dadkooda loo aqoonsanayo Qaxooti toos ah.

### Qdobka 23[aad]
### Dadka Aan u Qalmin Qaxootinimada

1) Qofku uma qalmo in la siiyo Qaxootinimo haddii: -

B) Uu galay danbiyo dagaal, danbiyo ka dhan ah nabadda iyo danbiyada laga galo aadanaha si waafaqsan Xeerarka Caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland qaybta ka tahay.

T) Uu galay danbiyo aan ahayn kuwo siyaasadeed ka hor intii aanu Jamhuuriyadda Somaliland soo galin kuna galay meel ka baxsan Jamhuuriyadda Somaliland.

J) Uu dembi culus oo aan siyaasad ahayn ku galay gudaha Jamhuuriyadda Somaliland ka dib imaanshihiisa.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

X) Uu galay falal lid ku ah mabaadii'da Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysa iyo kuwa Ururka Midawga Afrika.

2) Qof kasta oo haysta hal dhalasho wax ka badan oo fursad u heli kara in uu dalalka kale ee uu dhalashiisa haysto ku noolaado cabsi la'aan, isla markaana aan haysan sabab macquul ah oo aanu u tagayn dalalkiisa kale.

## Qodobka 24aad
## Ka Bixitaanka Xaaladda Qaxootinimada

1) Qofku waa uu ka baxayaa xaaladda Qaxootinimo haddii: -

B) Uu iskii ugu noqdo dalkiisa kuna noolaan karo.

T) Uu iska wareejiyo ama dhiibo Qaxootinimadiisa si iskii ah.

J) Uu dib u helo dhalashadiisii uu waayay ama lagala noqday.

X) Uu noqday muwaadin Jamhuuriyadda Somaliland ah si waafaqsan Xeerka Jinsiyadda Jamhuuriyadda Somaliland.

Kh) Shuruudihii iyo xaaladdihii Qaxootinimada loo aqoonsaday meesha ka baxaan.

D) Hadii waddan kale oo aan ahayn waddankii uu dhalasho ahaan ka soo jeeday uu ka helo degenaansho.

## Qodobka 25aad
## Qoyska Qofka Qaxootinimada Loo Aqoonsaday

1) Qof kasta oo da'diisu ka yar tahay 15 oo ka mid ah qoyska qofka Qaxootinimo loo aqoonsaday isla markaana soo codsaday in lagu daro qoyskiisa waxa uu helayaa xuquuq la mid ah xuquuqda qofka qaxootinimada loo aqoonsaday, waxaana loo ogolaanayaa: -

B) In uu dalka Jamhuuriyadda Somaliland soo galo kuna negaado ilaa inta qofka qaxootinimada loo aqoonsaday joogo.

T) In loo sameeyo loona soo saaro dhammaan wixii qoraal iyo aqoonsi ah ee la xidhiidha xaaladdiisa qaxootinimo si waafaqsan xeerkan.

2) Qof kasta oo da'diisu ka weyn tahay 15 sanno kana mid ah qoyska qofka loo aqoonsaday qaxootinimada ama magangelyo-doonimada waxa uu marayaa habraaca diiwaan-gelinta ee ku xusan xeerkan.

3) Haddii uu dhinto qofka Qaxootiga ama Magan-gelyodoonka loo aqoonsaday, qof kasta oo ka mid ah qoyskiisa wey u sugnaanaysaa xuquuqda lagu sheegay faqradda 1aad ee qodobkan xaqbayna u leeyihiin in ay ku joogaan sidii kii keenay dalka Jamhuuriyadda Somaliland ku joogay.

## Qodobka 26aad
## Midaynta Qoyska

1) Qofka Qaxootinimada la siiyay waxa uu ka dalban karaa Hay'adda in loo ogolaado xubnaha qoyskiisa in ay soo galaan dalka Jamhuuriyadda Somaliland si ay nolosha dib ugu midoobaan.

2) Marka la helo dalabka lagu sheegay faqradda 1aad qodobkan waxa la baadhayaa xidhiidhka qoysnimo ee ka dhaxeeya qofka qoxootiga ah iyo qofka ama dadka uu dalbanayo in loo keeno.

3) Codsiga dalbashada xubnaha qoyska waxa lagu caddaynayaa tirada xubnaha qoyska, magacyadooda iyo xidhiidhka qoys ee ka dhaxeeya.
4) Dalka Jamhuuriyadda Somaliland, waxa uu qaxootinimo siinayaa: -
   b) Qof kasta oo ka mid ah qoyska da'diisuna ka yar tahay 15 jir.
   T) Qof kasta oo ku tiirsan qoyska Qaxootinimada loo aqoonsaday, waxaa la siinayaa fursad uu ku maro habraaca diiwaan gelinta.
   j) Hab-raacyada dib u midawga qoyska waxa lagu faahfaahin doonaa xeer-nidaamiye Xeerkan ka dheegma oo ay soo saarto Hay'addu.

### Qodobka 27aad
### U Cabashada Maxkamadda Sare

1) Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Guddiga lagu sheegay Qodobka 11aad, waxa uu racfaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare soddon maalmood gudahood.
2) Cabashada Maxkamadda Sare loo gudbinayaa waxa ay ku salaysnaanaysaa saxnimada go'aanka iyo dabaqaadda xeerarka iyo habraacyada xeerarku tilmaameen.
3) Maxkamaddu waxa ay go'aan ka gaadhaysaa keliya in go'aamada laga cabanayo xeerka iyo habraacyada ka farcamay loo raacay iyo in kale.
4) Go'aanka Maxkamadda Sare waa kama danbeys.

## QAYBTA 5AAD
## WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA MAGANGALYO-DOONKA IYO QAXOOTIGA

### Qodobka 28aad
### Waajibaadka Magangalyo-doonka iyo Qaxootiga

1. Qofka magan-gelyo-doonka ama qaxootiga ahi si waafaqsan Qodobka 34aad ee Dastuurka, waxaa waajib ku ah.

   B) In uu ixtiraamo una hoggaansamo Dastuurka shuruucda iyo xeerarka kala duwan ee dalka Jamhuuriyadda Somaliland

   T) In uu raaco una hoggaansamo tallaabooyinka la qaado si amniga iyo kala danbeynta loo sugo.

   J) In aanu ka qayb qaadan wax shaqo ah oo halis galin kara amniga dalka, dhibaato ku ah maslaxadda guud ama wiiqaysa sharciga iyo kala danbeynta dalka.

   X) In aanu ka qaybqaadan wax arrimo siyaasadeed ah noocay doontaba ha noqotee.

   Kh) In aanu ku lug lahaanin wax lidi ku ah mabaadii'da cahdiga (charter) Qaramada Midoobay iyo Xeerarka kale ee caalamiga, gaar ahaana waa in aanu ka qayb qaadan, ku lug yeelan si toos ah iyo si dadban toona hawlo siyaasadeed oo lid ku ah waddan kale oo uu ku jiro waddankii uu asal ahaan ka soo jeeday.

   D) In uu ka run sheego xogta iyo macluumaadka la xidhiidha xaaladdiisa Qaxootinimo.

   R) In uu ixtiraamo dhaqanka, caadooyinka iyo anshaxa guud ee bulshadda Somaliland.
   S) In aanu ku xadgubin daryeelka iyo Ilaalinta deegaanka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

Sh) Qof kasta oo qaxooti ah oo qaatay aqoonsiga qaxootinimo marka uu ka dhaco kaadhka aqoonsigu waxa kuu waajib ah in uu iska xaadiriyo hay'adda si loogu cusboonaysiiyo.

Dh) Waajibaadka lagu xusay farqadda sare ee qodobkan, Xeerkan iyo Xeerarka kale ayaa loo raacayaa wixii waajib gudasho la'aan ah ee ka yimaadda qofka qaxootiga ama magangalyo-doonka ah.

2) Qofka Qaxootiga ahi haddii ganacsi ama illo kale oo dakhli ka soo galo sameeyo, waxa waajib ku ah in uu bixiyo cashuurta dakhliga ee ku waajibtay si waafaqsan Xeerarka Cashuuraha Dalka.

## Qodobka 29[aad]
## Xaqa Joogidda Dalka

1. Qof kasta oo qaxootinnimo loo oggolaaday si Qodobka 21aad ee xeerkan waafaqsan, waxa uu xaq u leeyahay in uu muddadaasi xeerku jideeyey ku noolaado dalka Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Qof kasta oo dalka ku jooga xaaladda magangelyo-doonimo waxa uu xaq u leeyahay in uu dalka joogo muddada lagu gudajiro hannaanka magangelyo siinta.
3. Iyada oo aan waxba loo dhimmayn nuxurka faqradda 1aad ee qodobkan waxa uu xaq u leeyahay in loo soo saaro kaadhka aqoonsiga Qaxootinimo si uu u helo xuquuqdiisa Qaxootinimo ama warqadda kumeel-gaadhka ah ee Qaxootinimo inta hawsha go'aaminta Qaxootinimo lagu jiro.
4. Qofka magangelyo-doonka ah inta ay dacwadiisa ka go'aan gaadhista Magangelyo-doonkiisu ay socota dalka lagama saari karo, waxaanu yeelanayaa xaqa socdaalka, in uu qareen kaalmaysto, in uu dacwoodo, in aan lagula kicin xadhig ama qabasho aan sharciga waafaqsanayn.
5. Waxaa reeban in qofka magangelyo-doonka ah lagu takooro dhalashadiisa, degaankiisa, midabkiisa, caqiidadiisa, isirkiisa iyo sifo kasta oo keeni kara takoor.
6. Qof kasta oo magangelyo-doon ahi wuxuu xaq u leeyahay in dacwadiisa ka go'aan gaadhista magangelyo-doonimo ay ku dhisnaato hab caddaalad ah oo daahfuran, isla markaana uu ku helaayo dhageysi caddaaladeed.
7. Qof kasta oo magan-gelyo ku helay si xeerkan waafaqsan, waxaa ka reeban inta aan loo aqoonsan qaxooti, in uu qabto shaqooyinka joogtadda ah, balse wuxuu qaban karaa shaqooyinka aan joogtadda ahayn iyo kuwa maalinlaha ah (casual labour).

## Qodobka 30[aad]
## Helidda Adeeg Waxbarasho

Qof kasta oo loo aqoonsaday Qaxooti waxa uu xaq u leeyahay in uu helo Waxbarasho Dugsi Hoose ilaa Dugsi Sare si lamid ah muwaadiniinta. Goobaha loo asteeyey qoxootiga ama magangayo-doon waxaa laga furayaa goobo waxbarasho oo lagu barto diinta islaamka waxana kareeban faafinta iyo barashada diin aan ahay ta Islaamka.

## Qodobka 31[aad]
## Helidda Adeeg Caafimaad

Qof kasta oo Qaxooti ama magangely-odoon ah waxa uu xaq u leeyahay in uu helo adeeg Caafimaad.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

### Qodobka 32aad
### Helidda Xorriyadda Dhaqdhaqaaqa iyo Socdaalka

Qof kasta oo loo aqoonsaday Qaxooti ama Magangelyo-doon, waxa uu u socdaali karaa ama tegi karaa goob kasta oo uu doono oo waddanka gudihiisa ah haddii aanu ku jirin xero qaxooti.

### Qodobka 33aad
### Helidda Hoyga

Qof kasta oo loo aqoonsaday Qaxooti ama Magangelyo-doon, waa inuu helo hoy uu dego ama goob kale oo loo asteeyey inuu ku noolaado.

### Qodobka 34aad
### Xorriyadda Is Abaabulka

1) Dadka loo aqoonsaday Qaxooti, waxay xaq u leeyihiin inay isu habeeyaan ururo bulsheed, cilmiyeed, dhaqameed, xirfadeed, ama kuwo shaqaale si xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka waafaqsan.
2) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn nuxurka faqradda 1aad ee qodobkan, waxa ka reebban urur kasta oo leh ujeeddooyin lid ku ah danaha umadda ama qarsoodi ah ama Ieh qaab ciidan ama hubaysan amaba kuwa kale oo khilaafsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah weji kasta ha lahaadeene.

### Qodobka 35aad
### Xaqa Shaqada

Qof kasta oo loo aqoonsaday Qaxooti waxa uu leeyahay xuquuq la mid ah tan muwaadinka marka laga hadlayo shaqada wixii aan xeerarka kale ee dalku u diidayn.

### Qodobka 36aad
### Helidda Hantida

1) Qof kasta oo loo aqoonsaday Qaxooti, waxa uu yeelan karaa hanti a a n m a guurto ahayn.
2) Waxa uu leeyahay xaqa in uu iibsado, iibiyo ama sifo kale oo Sharci ugu isticmaalo hantidiisa gaarka ah si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee waddanka.
3) Waxaa kareeban inuu ku shaqaysto, hantidiisa geliyo wax ay xaaraan ka dhigtay shareecada islaamku.

### Qodobka 37aad
### Helida Adeeg Caddaaladeed

Qof kasta oo loo aqoonsaday Qaxooti ama magangelyo-doon waxa uu xaq u leeyahay in uu helo caddaalad iyo garsoor madax-bannaan.

### Qodobka 38aad
### Dhexgalka Bulshada

Dawladdu waxa ay xaddidi kartaa xaqa is dhex-galka si waafaqsan Siyaasadda amniga guud ee Qaranka, dhaqanka iyo Shareecada Islaamka.

### Qodobka 39aad
### Kaadhka Aqoonsiga Qaxootinimo

1. Qof kasta oo loo aqoonsaday qaxootinnimo waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo Kaadhka aqoonsiga qaxootinnimada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Muddada ay socoto ka go'aan gaadhida codsiga qaxootinnimadu qof kasta oo loo aqoonsado magangelyo-doon waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo warqad caddaynaysa in loo aqoonsaday magangelyo-doon.
3. Kaadhka aqoonsiga qaxootinnimo iyo warqadda aqoonsiga magangelyo-siinta waa in ay ka muuqdaan xogahan soo socdaa: -
   - B) Magaca iyo astaanta cidda bixisay.
   - T) Magaca qofka la siiyay.
   - J) Sawirka qofka la siiyay.
   - X) Lambarka tixraaca aqoonsiga.
   - Kh) Taariikhda la bixiyay iyo taariikhda uu dhacayo.
   - D) Xaaladda qofka qaxootinnimo.
   - R) Dhalashadiisa.
4. Macluumaadka kaadhka aqoonsigu ka kooban yahay ee lagu sheegay faqradda 3aad ee qodobkan waxa lagu qorayaa luuqadaha soomaliga iyo luqaddii kale ee loo baahdo.
5. Kaadhka aqoonsiga Qaxootinnimada iyo warqadda aqoonsiga magangelyo-doonka waxa bixinaya hay'adda.
6. Muddada kaadhka aqoonsiga qaxootinnimo waa hal (1) sanno, halka warqadda aqoonsiga magangelyo-doonku tahay 3 billood.
7. Marka muddada ku xusan farqadda 6aad ee qodobkan ay dhammaato isla markaana aanay waxba iska beddelin xaaladda qaxootinimo, waxa loo cusboonaysiinayaa muddadii hore ee dhukumentiga ku xusnayd muddo la mid ah.

## Qodobka 40aad
## Waxyaabaha ka Reeban Qofka Qaxootiga ama Magangelyo-doonka ah

1. Qofka Qaxootiga ama Magangelyo-doonka ah waxaaka reebban arrimahan: -
   - B) Kicin, abaabul, gacan-siin qalalaase iyo wax kasta oo waxyeeli kara nabadgalyada bulshada uu la nool yahay, qaranka iyo waddamada kale ee caalamka.
   - T) Keenidda, soo dejinta, samaynta, ka ganacsiga hubka iyo waxyaalaha qarxa.
   - J) Ka qayb-qaadashada, caawinta ama gacansiinta iyo dhiirrigelinta argagixiso iyo falal argagixiso.
   - X) Ku hawlanaata ama caawinta soo saarista, beerista, sifaynta, dhoofinta, soo dejinta, keydinta, ka ganacsiga, haysashada, isticmaalka ama qaybinta maandooriyaha nooc kasta oo uu yahay.
   - Kh) Tahriibinta, gacan-siinta iyo fududaynta arrimaha ka ganacsiga dadka.
   - D) Faafinta diin aan ahayn diinta Islaamka.
   - R) Fal kasta oo ka dhan ah/lid ku ah diinta Islaamka iyo dhaqanka suuban ee bulshada uu la nool yahay.
   - S) Wax kasta oo Xeer reebay ama ka reebban qofka muwaaddinka ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# QAYBTA 6AAD
# WAAYIDDA IYO KALA NOQOSHADA QAXOOTINIMADA

## Qodobka 41[aad]
## Waayidda Xuquuqda Qaxootinimo

Waxyaabaha qofka Qaxootinimada ku jooga Jamhuuriyadda Somaliland, ku waayi karo Qaxootinimadiisa, waxa kamid ah: -

B) inuu ku kaco fal-dambiyeed ciqaabtiisu ay tahay sannad iyo wax ka badan, isla markaana ay kaga hor caddaato Maxkamad awood u leh.

T) Haddii uu ku kaco fal kasoo horjeeda ujeeddooyinka iyo Mabaa'diida Qaramada Midoobay iyo Midowga Afrika ee la'xidhiidha Qaxootiga.

J) Haddii ay ku caddaato in uu fal-dambiyeed halis ah ku soo galay meel ka baxsan dalka Jamhuuriyadda Jamhuuriyadda Somaliland, ka hor intaan laga aqbalin in uu Jamhuuriyadda Somaliland ku joogo Qaxootinimo.

X) Haddii uu ku kaco fal kasoo horjeeda Jiritaanka iyo Madaxbannaanida Jamhuuriyadda Somaliland.

Kh) Haddii uu ka helo dib-u-dejin waddan saddexaad, isla markaana ka tanaasulo dukumentiga qaxootinnimo ee dalka JSL.

## Qodobka 42[aad]
## Kala noqoshada Qaxootinimo

1) Qofka qaxootiga ah waa lagala noqon karaa qaxootinimada haddii ay jiraan sababo macquul ah oo lagu rumaysan karo in aanu qofkaasi qaxootinimada xaq u lahayn.
2) Qaxootinimada waxa qofka lagala noqon karaa haddii: -
   B) Qof kasta oo qaxooti ah oo dalkiisii dib ugu noqda kuna soo laabta dalka Jamhuuriyadda Somaliland.
   T) La ogaado in uu qofku ka been sheegay xogtii uu bixiyay markii la siinayay qaxootinimada.
   J) Uu helay dhalasho dal kale oo cusub.
3) Qofka lagala noqonayo qaxootinimada, waa in la ogaysiiyo go'aanka kala noqoshada ugu yaraan sodon maalmood ka hor inta aan go'aanka la gaadhin.
4) Guddiga Go'aan Kagaadhista Qaxootinimadu, marka uu gaadhayo go'aanka kala noqoshada waa in uu: -
   B) Qofka ku wargaliyaa jiritaanka kala noqoshada qaxootinimada iyo asbaabta keentay oo qoraal ah.
   T) Qofka la siiyo fursad lagu dhagaysto oo ku soo bandhigo xogta iyo caddaymihiisa qaxootinimo.
5) Go'aan kasta oo la xidhiidha la noqoshada qaxootinimadu waa in uu noqdo mid qoraal ah oo si cad u sheegaya asbaabta kala noqoshada.

## Qodobka 43[aad]
## Ka Saaridda dalka

1) Qofka loo aqoonsaday Qaxooti lagama saari karo dalka haddaanay jirin arrimo khatar ku ah nabadgelyada guud iyo xasilloonida dalka oo uu ku kacay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Qofka laga laalay ama lagala noqday aqoonsiga qaxootinnimo waa laga saari karaa waddanka 90 maalmood gudahood.
3) Go'aanka kama dambaysta ah ee lagaga saarayo waddanka waxa fulinaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, ka dib marka ay sidaas go'aamiso Guddiga Go'aan ka Gaadhista Qaxootinimada.
4) Fulinta go'aanka ka dhanka ah qofka Qaxootiga ah lagaga saarayo waddanka, waxa dib loo dhigi karaa muddo macquul ah haddii uu sidaas codsado si fursad loogu siiyo in uu raadsado dal kale oo aqbala.

### Qodobka 44aad
### Reebanaanta in qof magangalyo-doon ah in lagu ciqaabo joogitaanka dalka

1. Waxaa reeban in Qofka magan-gelyo doonka ahi uu ciqaab ku mutaysto haddii uu dalka ku joogay ama kusoo galay isagoon wax dukumenti ah haysan ama joogida dukumenti la'aanta oo kaliya.
2. Haddii ay laanta socdaalku amaba laamaha kale ee amniga ay ogaadaan in aanu qofka magangelyo-doonka ahi aanu sharci dalka kusoo galin ama aanu ku joogin, waxaa waajib ku ah in ay u gudbiyaan guddidda uu xeerkan aassaasay si go'aan ay uga gaadhaan magangelyo-doonimadiisa

### Qodobka 45aad
### Xadhiga Kumeel-gaadh ah ee Qaxootiga La-saarayo

1) Qofka Qaxootiga ah ee la go'aamiyay in waddanka laga saaro si ku meelgaadh ah ayaa loo xidhi karaa haddii ay caddaato in uu khatar ku yahay xasilloonida iyo nabadgelyada guud ee dalka ama laga cabsi qabo in uu baxsado.
2) Hadii sababihii loo xidhay ay meesha ka baxaan waa in la sii daayaa.

### Qodobka 46aad
### Dib-u-Celinta Magangalyo-doonka iyo Qaxootiga

1) Qof kasta oo soo galay dalka jamhuuriyada Somaliland wixii ka horeeyey xeerkan dib ayaa loo diiwaangelinayaa iyadoo loo eegayo cadaymaha ay hore ugu diiwaangashanaayeen.
2) Qof kasta oo sifo sharci darro ah ku joogay dalka muddada ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan waxaa dib loogu celinayaa dalkiisii uu u dhashay.
3) Qof kasta oo loo aqoonsaday Qaxooti ama Magangelyo-doon si xeerkan waafaqsan, loogama saari karo dalka si aan waafaqsanayn xeerkan lagumana celin karo waddankiisa haddii aanu isagu sidaas codsan.
4) Hab-raaca dib u celinta Qaxootiga ama Magan-gelyodoonka waxa lagu faahfaahin doona hageyaasha iyo tilmaamaha ay soo saarto Hay'addu.

## QAYBTA 7AAD
## QODOBO KALA DUWAN
### Qodobka 47aad
### Wada Shaqaynta iyo Iskaashiga

1) Hay'addu waxa ay wada shaqayn iyo iskaashi dhaw la yeelanaysaa dhammaan hay'adaha dawladda, hay'adaha Qaramada Midoobay, ururada caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee u qaabilsan daryeelka iyo kaalmaynta dadka Qaxootiga iyo magangelyo-doonka ah
2) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn nuxurka faqradda 1aad ee qodobkan, Hay'adu waxay wada shaqayn dhaw la yeelanaysaa Hay'adda Qaramada Midoobey u qaabilsan Qaxootiga ee UNHCR waxayna yeelanayaan heshiis Isfaham oo waafaqsan Xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3) Hay'addu waxa ay u fududaynaysaa Hay'adda UNHCR in ay waajibaadkeeda u gudato si waafaqsan Xeerarka Qaramada Midoobay iyo Xeerarka dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

### Qodobka 48aad
### Luqadda Xeerkan

Afka (Luuqadda) Xeerkani waa Af-Somaali, haddii af-kale lagu minguuriyo (lagu tarjumo), oo ismaan-dhaaf ama khilaaf ka yimaaddo, waxa loo noqonayaa nuxurka nuqulka Af-Soomaaliga ah.

### Qodobka 49aad
### Kaabista iyo Wax ka bedelka Xeerka

Xeerkan waxaa lagu samayn karaa kaabis iyo wax-ka-beddel markasta oo loo baahdo isla markaana ay u muuqato lagama maarmaan.

### Qodobka 50aad
### Xeer-nidaamiyaal

Hay'addu waxa ay soo saaraysaa xeer-nidaamiyeyaal, hageyaal, hab-raacyo iyo buug-yareyaal la xidhiidha fulinta iyo dhaqangalinta qodobbada Xeerkan.

### Qodobka 51aad
### Nasakhaad

Waxa la nasakhay Xeer kasta ama qodob kasta oo xeer, digreeto kasta oo ku saabsan arrimaha qaxootiga oo aan la jaanqadayn ama ka hor imanaysa qodobada xeerkan.

### Qodobka 52aad
### Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka ay golayaasha xeer-dejintu ansxiyaan Madaxweynuhuna saxeexo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL

________________________________

Md. Siciid Mire Faarax (Giire)
Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad, ahna ku simaha
Gudoomiyaha Golaha Wakiillada JSL

________________________________



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE